

HAGAHAAGA QARASHKA CAAFIMAADKA

Qarashka GP-ga: Badanaa dhammaan adeegyada GP-gagubaxshaa waa bilaash. Laakiinse haddii aad tahay cid debadda Dalka booqasho ugu timi waxaa laga yaabaa in GP araga lacag lagaaga qaado. GP-gagu adeegyada qaar qarash buu ka qaataa sida, talaalka safarka, baadhitaanada ama warbixinada Caafimaad ee shaqo-bixiyaha ama caymiska loo rabo. Uma baahnid in aad qarsh ka bixisid wixii warbixin GP-ga ay kaa codsadaan Waaxda Shaqada iyo Hawlgabistu (DWP) sida marka aad lacagta cayr dalbanaysid. Haddii ay jiraan wax qarash ah oo GP-gagu ku yiri bixi oo aanad hubin ka warso laanta Caafimaad ee Islington (Islington PCT) ama Talo-bixinta Bukaanka iyo Adeegga Wada xiriirshaha (PALS).



Booqashada dhakhtarka ilkaha:

Fiiiri jadwalka Buugyarahan dhiniciisa kale ku yaal si aad u ogaato in aad heli kartid daaweyn ilko bilaash ah. Haddii aadan kari karayn waxaad weli qaadan kartaa daaweyn ilko oo

NHS bixiso taas oo

ka qarash yar daaweynta ilkeed ee gaarka ah. Laanta Caafimaad ee Islington waxay leedahay liiste dhakhaatiirilkoodka NHS-ta iyo faahfaahinta afafka ay ku hadlaan ah Xasuusnow! Turjumaanka waxaa kuu qaban kara dhakhtarka ilkaha haddii aad mid u baahan tahay.



Islington PALS: 020 7527 1182

Islington PCT: 020 7527 1086/7

Haddii daryeel caafimaad laguugu diiday xaaladaada qaxooti-nomo darteed soo wac Golaha Qaxootiga [Refugee Council] 020 7346 6777

Haddii aad :	Dawo qaadashadu	Arag baadhis	Okiyaale	Daawaynta ilkaha NHS-ta	Dhakhtar u socdaalka	Sidee qarashka caawimo loogu dalbadaa	Xagee caawimada qarashka laga dalbadaa
60 jir ka weyn tahay	Waa bilaash	Waa bilaash	–	–	–	Si otomaatik ah	–
Qaadatid dheefaha 'Pension Credit Guarantee', JSA, Inkam saboorka	Waa bilaash	Waa bilaash	V	Waa bilaash	Waa bilaash	Si otomaatik ah	–
'In a care home' dawladda hoose taageerto	C	C	C V	C	C	Foomka HC1 (sc) si loo helo cadaynta HC2 ama HC3 certificate	Foomka ka codso maamulaha aqalada 'care home' ama wac 0845 850 1166
Magangelyodoon IND-gu taageero	Waa bilaash	Waa bilaash	V	Waa bilaash	Waa bilaash	Si otomaatik ah: ayaa cadaynta HC2 certificate – loo soo diri	–
Magangelyo doon la diiday ama aan IND-gu taageerin	C	C	C V	C	C	Foomka HC1 si loo helo HC2 ama HC3 certificate	Foomka ka codso Isbitaalka ama 'Jobcentre Plus'ka ama wac 0845 850 1166
Qaata 'Working Tax Credit' ama Child Tax Credit	C	C	C V	C	C	Codso cadaynta ka dhaafista dulsaarka 'Tax Credit'-ka	Wac 0845 609 9299
Dakhli hooseeya ku nool	C	C	C V	C	C	Foomka HC1 si loo helo HC2 ama HC3 certificate	Foomka ka codso Isbitaalka ama 'Jobcentre Plus'ka ama wac 0845 850 1166

C = waa mid jaban ama bilaash ah V = foorjar qarashka lagu bixinayo IND: Laanta Imigareeshanka iyo Jinsiyadda
 HC2 certificate – caawimo buuxda ayey qarashka kaa siisaa HC3 certificate- qayb caawimo ayey qarashka kaa siisaa